

Qorshaha Horumarinta iyo wanaajinta ee Dugsiga Sare ee Como Park Senior oo Kooban

Qorshaha horumarinta joogtada ahaa ee iskuulka Como Park ee (SCIP) wuxuu ku salaysanyahay talooyinka masuuliyiinta iskuulka, shaqaalaha iskuulka, waalidiinta iyo ururada bulshada. Qorshaha (SCIP) ayaan diiradda ku saaraynaa horumarinta iskuulka loogu dajiyi koorsooyinka sanadka iyadoo islamarkaana u noqon karta hoggaan arrimaha iskuulkeena ee dhinaca waxbarashada iyo sinnaanta. Qorshaha (SCIP) wuxuu tilmaan naga siinayaa istaraatiijiyada la xiriirta kaalmada Title I iyo la shaqaynta qoysaska. Qorshaha (SCIP) oo dhamaystiran waxaad ka heli kartaa www.scip.spps.org

Ujeedada Hawgalkanaga: Diyaarinta goob hodon ku ah waxbarasho islamarkaana ka taageerta dhammaan ardayda sidii ay guul ku gaari lahaayeen oo ay usii wadi lahaayeen safarkooda waxbarsho ee mustaqbalka.

Himilooyinka SCIP ee 2016-2017:

Akhriska: Tirada ardayda fasallada 10-aad ee ku baasaya imtixaanada akhriska inay sare uga kacaan 29.8% ilaa 35.3% gu'ga 2017 sida lagu cabbiray imtixaanaadka MCA-III ee laqaaday xilliga Guga ee 2017.

Xisaabta: Tirada ardayda fasallada 11-aad ee ku baasaya imtixaanada xisaabta inay sare uga kacaan 22% ilaa 27% sida lagu cabbiray imtixaanaadka MCA-III ee laqaaday xilliga Guga ee 2017.

Dhaqaalaha Title I

Dhaqaalaha Title I ee CPSHS waxaa lagu kharash-gareeyaa dhinaca waxbarashada iyo isku-xirka iyo la shaqeynta waalidiinta oo ay ka mid yihiin:

- Akhriska, Xisaabta, iyo macallimiinta barnaamijka AVID
- Ardayda u baahan fara galin waxbarasho iyo khubarada dhaqanka
- Isku duwaha isku-xidhka waalidiinta iyo iskuullada

Qorshaha Wadashaqaynta Qoyska

Waalidiinta iyo goloyaasha bulshadu waxay kulmaan bishiiba hal mar.

Shirka waalidiinta iyo macallimiinta waxaa la qabanayaa sadexdii biloodba mar.

Labo siminaar oo machadka waalidiinta ah oo ku baxaya afar luqadood ayaa laqaban doonaa dayrta.

La qaxwaynta (coffee) maamulaha iskuulka iyo guddiga waxaa laqabanayaa bil walba mar.

Waalidiinta ku lug leh (Parent and Community Council-PCC) iyo kooxaha waalidiinta ee dhaqanka (Cultural parent groups) waxay siiyaan talooyin barnaajmyada (Family Engagement Plan) iyo (Family-School Compact).

Qorshaha wadashaqaynta Qoysaska waxaa laga heli karaa barta internet-ka ee Comosr.spps.org